


**Jamhuuriyada Somaliland
Dawladda Hoose Hargeysa
Xafiiska Duqa Caasimada**



**Republic of Somaliland
Municipality of Hargeisa
Mayor's Office**

Go'aan Lr: 204/2024.

Date: 7th February 2024.

Go'aan Guddi Fulineed.

Shir ay isugu yimaadeen guddida fulinta Caasimada Hargeysa 7th February 2024, Shir Guddoomiyena uu ka yahay Duqa Caasimada Hargaysa Mudane **(C/kariim Axmed Mooge)**, kuna saabsanayd Tirtirid/Cancelid Faylka TR-lambarkiidu yahay **2606**, Dood & falan-qayn dheer ka dib.

Guddida Fulintu:-

Markay Arkeen

Sharciga Maamulka Gobolada & Degmooyinka JSL ee Xeer No: 23/2019.

Markay Arkeen

Warbixinta tixraaceedu yahay **DH/AGDHDHH/211/2023**, kuna taariikhaysan **24/9/2023**, ujeedadeeduna tahay warbixin dhul, kana soo baxday Xafiiska Agaasimaha Waaxda Dhulka DHH, warbixintan oo uu ku tallo bixiyay in beer kasta lagu kala xadeeyo 12m oo waddo ah.

Markay Oggaadeen

Warbixinta tixraaceedu yahay **XDJ/WDHH/14/2023**, kuna taariikhaysan **3/2/2024**, ujeedadeeduna warbixin dhul, kana soo baxday Xafiiska Agaasimaha Waaxda Dhulka Dawladda Hoose ee Hargeysa, warbixintan oo tilmaamaysa in la tirtiro faylka TR-kiisu yahay 23906.

Markay Xaqiiqsadeen

In ay haboon tahay in in la tirtiro faylkan, maadama oo oo faylkani noqday waddo, isla markaana uu xanibay faylka kale ee TR-kiisu yahay 23906.


Markay Tixgeliyeen

Tallada Masuuliyiinta ay hawshani khusayso.

Waxa ay Go'aansadeen :-

Ka dib markey arkeen dhamaan asbaabaha sare ku xusan, Gudida Fulintu waxa ay Go'aansadeen in la Tirtiro faylka TR-Lambarkiisu yahay **2606**, lagana saaro system-ka, kaasoo ku qoran yahay muwaadinka magaciisu yahay **(Cabdi Yuusuf Aar)**, cabirkiisuna dhan yahay **54X24m**, kuna yaala Degmada **I/Koodbuur**, maadama uu noqday faylkani waddo, isla markaana la sii daayo faylka TR-Lamberkiisu yahay 23906 ee uu ku qoran yahay muwaadinka magaciisu yahay Mukhtar Cismaan Jaamac.

(Axmed Weheliye Cabdi).
K/S Xoghayaha Fulinta D/Hoose ee Hargeysa.




Mahad

leh.

(Khadar Axmed Cumar 'Khadar Nuur').
Ku-xigeenka Duqa Caasimada Hargeysa.



(C/kariim Axmed Mooge).
Duqa Caasimada Hargeysa, ahna Guddi
Golaha Degaanka Caasimada Hargeysa.



**Jamhuuriyada Somaliland
Dawlada Hoose Hargeysa**



**Republic Of Somaliland
Municipality Of Hargeisa**

Xafiiska Aggasimaha Waaxda Dhulka D.H.H

Ref/XDH/WDHH/12/2024.

Date: 03/02/2024

KU: Maamulka Geosol

Og: Duqa Caasimadda jsl

Og: M/ku/Xigeenka Caasimadda jsl

Og: Xoghayaha Fulinta Dawlada Hoose

=Hargesya=

=Hargesya=

=Hargesya=

=Hargesya=


Ujeedo: Warbixin Dhul

Waxaan halkan idinku soo gudbinayaa warbixinta Fileka uu leeyahay muwaadinka magaciisu yahay **Mukhtaar Cismaan Jaamac TR-23906**, waxa uu ku yaala degmada I/koodbuur gaara ahaan Xafada xeedho, hadaba waxaad tirtirtaan fileka Trkiisu Yahay **TR-2606** ee uu leeyahay **Cabdi Yuusuf Aar** cabirkiisuna yahay $54*24M= 1,296ms$ tasoo u keenay dhammaan fileskii uu goobtan uhaystay.

Sidaa daraadeed waa in systemka laga saara filkaas, loona sii daaya fileka kale ee taagan ee uu leeyahay mukhtar cisman jaamac tr-23906.

Maxamed Yuusuf Cismaan

Aggasimaha Waaxda Dhulka



Email: Mohamed.Yuusuf@dhhgov.org Hargeysa

Ku: blana
Sence jooj in
systemka Loya
dono fexkaas.
Loona sii daayo
-fexka kale
06/02/2024



ALLA MAGAN PUBLIC NOTARY, HARGEISA

REF/DN942/23

23 October 2023

Ujeedo: Caddayn Ballanqaad Bixin Lacageed

Aniga oo ah Cabdi Yuusuf Aar oo Xagga hoose saxeexay waxaan halkan ku caddaynayaa in Xasan Axmed Gubadle dhulkii aan hore uga iibiyey sida ku cad qoraalka sumadiisu tahay tir/Aph/Har/1973/5382/2021 ee 06/12/2021, dhulkaas oo cabbirkii aan ka iibiyey qayb ka mid ahi ay noqotay waddo qaybina ay u soo hadhay, kaas qaybta u soo hadhay uu sideeda u qaatay qaybta waddada noqotayna aanu ku heshiinay in aan ugu celiyo lacag dhan US\$ 35,000 (shan iyo soddon kun oo dollars) hore waxaan u siiyey \$5,000 baaqiga hadhay ee dhan US\$30,000 waxan ku ballanqaadayaa in aan ku bixin doono 20 gadahood oo ka bilaabmaysa maanta oo ah 23/10/2023.

Sidaa darteed, waxaan caddeyntan qoray oo aan saxeexay aniga oo miyir iyo maanba qaba oo aanay cidi i qasbin.

Cabdi Yuusuf Aar tel:063-4420133.....

Oggolaansho

Aniga oo ah Xasan Axmed Gubadle oo Xagga hoose saxeexay waxaan halkan ku caddaynayaa in aan ogolaaday caddeynta iyo Ballanqaadka Kor Ku xusan kuna qaatay lacagta kor ku qoran sidaana aanu ku dhamaysanay.

Xasan Axmed Gubadle tel:063-4410305.....

Markhaatiyaasha Goobjooga ah:-

1. Axmed X. Cabdi Nuur tel:063-4429201.....
2. Subeer C/raxmaan Nuux Tel:063-4044414.....

CADDEYN NOOTAAYO

Aniga oo ah Sarkaalka Nootaayada waxaan caddeynayaa in Caddeynta iyo dammaanadda kor ku xusani ku sugantay nootaayada horteeda oo labada dhinac warqadda ku saxeexeen Nootaayada horteeda.

Maxamuud C/raxmaan Jaamac





Xafiiska Aggasimaha Waaxda Dhulka

Ref/DH/AGDHDHH/_211/2023.

Date: -24/09/2023

KU:Duqa Caasimda Jsl

OG:Gudoomiyaha Guddida Hubinta Iyo Dabagalka Dhulka

OG: Xoghayaha dawlada hoose

OG:Xigeenka duqa caasimada

=Hargaysa

=Hargeysa=

=Hargeysa=

=Hargeysa=

Ujeedo:Warbixin dhul

Mudane Maayir

Waxaan halkan kuugu soo gudbinayaa warbixin ku sabsan dhul ku yalla degmada I/K/Buur taas oo aan u diray Madaxa Qorshaha & Fidinta Caasimada ENG: Amiin Abdi Axmed waxanu ku soo warbixiyey sidan Hoos ku xusan:-

Wan tagay dhulkan ku yalla degmada I/K/buur Gaar ahaan BEERAHA kale ah ILMA C/Laahi Ceelaabe & ILMA C/Laahi Xasan.

Hadaba waxaan mudane Moyer ku talin bixin lahaa in la raaco Xeerkaa ahaa in Beer kasta lagu kale Xadeeyo 12m oo dhan kastana laga Jarro 6m, madama ay hada labada Beerood kale qorshe noqdeen.

Waddadana aynu ka dhigno 12M, laakiin block cabirkiiisu yahay 90*48m ee leeyahay mukhtaar waxba kama go'ayaan sababta oo ah dhamaan dhulkiisu sida aan soo sheegay waxa uu ku jiraan beerta ilma c/laahi ceelaabe, balse dhanka kale ayaa ay wax ka go'ayaa oo cabir ahaan noqonaysa 12M xaga xigta galbeedka iyo 6M oo xigta bariga.

FG: waddada dhanka Bari way ka dhan tahay bale dhanka galbeed ayaa xidhan oo seesan, sida uu xalku noqonayana waxa kusoo muujiyey sawirka GPSka.

Allaah Mahad Leh

Maxamed Yuusuf Cismaan
Aggasimaha Waxda Dhulka



Ku: Ag...
Xafiiska
Jeedisay duqa

Moh...

JAMHUURIYADDA SOMALILAND



Dawladda Hoose ee Hargeisa

Ku: Maayer Ku-Xigeenka Caasimadda Hargeisa.

Tar: 03/06/2023

Ujeedo: - Jawaab celin

Mudane, maayir ku xigeen, kadib markii aad ii dirtay in aan warbixin kaaga keeno dhulka TR lambarkiisu ahaa 2606. Waa sidan warbixintiisu.

Labada beerood ee Ilma Cabdilaahi Ceelaabe iyo Ilma Cabdilahi Raqleeye, leeyihiin kuna taala degmada Ibrahim Koodbuur, xaafadda Jigjiga yar. Labada reer Waxay hore ugu heshiiyeen oo ay warqad nootaayo ku kala qorteen in ay labadooda beerood is dhex galaan warqadaas oo aan halkan kusoo lifaaqay. Dhulkaas oo qorshahoodu sidaas yahay, kuna sharci garoobay inbadana sidaa ku dhisantay.

Sidaa daraadeed mudane maayir ku xigeen waxaan soo xaqiijiyeey in labada reer ku heshiiyeen in ay labadooda beerood is dhexgalaan. Dhulkana wuu sharciyeysanyahay waxaana uu leeyahay TR No, kor ku qoran.

Axmed Cali Ciyaale (Cirguje)